

*South Dakota*

# Buug-gacmeedka Sheegashada

Hagaha Gunnooyinka Caawimaadda  
Dib-u-Shaqaynta

**English**

**IMPORTANT!** This document(s) contains important information about your reemployment assistance compensation rights, responsibilities and/or benefits. It is critical you understand the information in this document.

**Immediately:** Interpreter services are available free of charge. Call 605.626.2452 for assistance with the translation of the information in the document(s) you have received in your preferred language.

**Español (Spanish)**

**¡IMPORTANTE!** Este documento contiene información importante sobre sus derechos, responsabilidades y/o beneficios de compensación de asistencia para la reincursión laboral. Es fundamental que entienda la información de este documento.

**Inmediatamente:** Los servicios de interpretación son gratuitos. Llame al 605.626.2452 para que le ayuden con la traducción de la información de los documentos que ha recibido al idioma de preferencia.

**Soomaali (Somali)**

**MUHIIM!** Dukumentigan waxaa ku jira macluumaad muhiim ah oo ku saabsan xuquuqdaada magdhowga gargaarka dib-u-shaqaalaynta, mas'uuliyadaha iyo/ama dheefaha. Waa muhiim inaad fahamto macluumaadka ku jira dukumintigan.

**Isla markiiba:** Adeegyada turjumaanku waa lacag la'aan. Wac 605.626.2452 si lagaaga caawiyo fasiraada macluumaadka ku jira dukumintiga aad ku heshay luqadda aad doorbiday.

**አማርኛ (Amharic)**

**አስፈላጊ!** ይህ ሰነድ(ዎች) ስለ የእርስዎ ዳግም ቅጥር እርዳታ ካሳ መብቶች፣ ኃላፊነቶች እና/ወይም ጥቅማ ጥቅሞች ጠቃሚ መረጃን ይዟል። በዚህ ሰነድ ውስጥ ያለውን መረጃ መረዳትዎ በጣም አስፈላጊ ነው።

**ወዲያውኑ፡-** የአስተርጓሚ አገልግሎቶች ከክፍያ ነጻ በመሆን መልኩ ይገኛሉ። በመረጡት ቋንቋ በተቀበሉት ሰነድ(ዎች) ውስጥ ያለውን መረጃ ትርጉም እንዲረዳዎ ወደ 605.626.2452 ይደውሉ።

**ትግርኛ (Tigrinya)**

**አገዳሲ!** እዚ ሰነድ(ዳት) እዚ ብዛዕባ መሰል ካሕሳ ስራሕካ፡ ሓላፍነታትካ ከምኡ ዉን/ወይ ጥቕምታትካ አገዳሲ ሓበሬታ ሒዙ ኣሎ። ነቲ ኣብዚ ሰነድ እዚ ዘሎ ሓበሬታ ኽትርድኦ ኣገዳሲ እዩ።

**ብህጹጽ፡-** አገልግሎት ተርጓሚ ብናጻ እዩ ዚርከብ። ነቲ ኣብቲ እትፈልጦ ቋንቋ እተቐበልኩሎ ሰነድ(ዳት) ዘሎ ሓበሬታ ንምትርጓም ምእንቲ ኺሕግዘካ 605.626.2452 ደዊልካ ጽሓፍ።

# Shaxda Tasmada

<b>Ku saabsan buug-gacmeedkan .....</b>	<b>1</b>	<b>Shuruudaha Shaqo Raadinta .....</b>	<b>10</b>
Ujeedada Buug-gacmeedka Sheegashada		Waa maxay tafaasiisha aan uga baahanahay dadka aan shaqo kala xiriirayo?	
Macluumaadka xidhiidhka		<b>Shaqada Dugsiga, Tababarka, ama Imaanshaha Dugsiga .....</b>	<b>11</b>
Caawimaadda luuqadda		Shaqaalaysiinta dugsiga	
<b>Macluumaadka Caawimaadda</b>		Tababarka ama imaanshaha dugsiga	
<b>Dib-u-Shaqaynta .....</b>	<b>2</b>	<b>Kugu Celinta Shaqada .....</b>	<b>12</b>
Waa maxay Caawimaadda Dib-u-Shaqaynta (RA)?		Isku diwaangeli Adeegyada Dib-u-Shaqaynta	
Maalgelinta Barnaamijka RA		Adeegyada Dib-u-Shaqaynta ee Khasabka ah	
Warqadaha elegtarooniga ah		Adeegyada dheeraadka ah ee ku caawinaya	
Beddelaada cinwaanka ama lambarka taleefanka		<b>Shaqo Raadin .....</b>	<b>12</b>
<b>Waxa Aad U Baahan Tahay Inaad Ogaato Marka Aad Codsanayso Gunnooyinka .....</b>	<b>3</b>	<b>Xafiisyada Adeegga Shaqada ee South Dakota .....</b>	<b>12</b>
Si sax ah u soo sheeg sababta aad shaqo la'aan u tahay		<b>Shan (R) oo ay tahay in la xasuusto Marka la codsanayo Gunnooyinka RA.....</b>	<b>13</b>
Diiwaangelinta shaqada ayaa loo baahan yahay		<b>Bilaabida iyo Joojinta Sheegashadaada .....</b>	<b>13</b>
Xaraynta sheegashadaada la mid maaha codsiga lacag bixinta		Sideen u kansal garayn karaa sheegashadayda?	
Ka warbixi dhammaan saacadaha aad shaqeysay iyo wixii mushahar ah ee aad qaadatay		Sideen u joojin karaa lacag bixinta gunnada?	
Arrinta u-qalmitaanka ee la sugayo		Sideen dib ugu bilaabayaa lacag bixinta gunnada?	
<b>Qadarka Gunnooyinka RA .....</b>	<b>4</b>	<b>Khiyaaida RA .....</b>	<b>14</b>
Dookhyada lacag bixinta		RA waxay mas'uul ka tahay inay hubiso in gunnooyinka la bixiyo marka ay wakhtigooda gaaraan.	
Canshuurta dakhliga federaalka		<b>Lacag-bixinta Xad Dhaafka ah ee RA .....</b>	<b>15</b>
Toddobaadka sugitaanka		Maxaa dhacaya haddii aan helo lacago aanan xaq u lahayn?	
<b>U-qalmida Gunnooyinka RA .....</b>	<b>5</b>	Ka-dhaafida lacag bixinta xad dhaafka ah	
Sababta ka soo tagitaanka shaqada		Baaritaanada sheegashada	
Awood leh, la heli karo, oo codsan kara shaqo		<b>Go'aannada u-qalmitaanka, Habka Racfaanka, iyo Dib-ugu-qalmitaanka .....</b>	<b>16</b>
<b>Macluumaadka Lacag-bixinta .....</b>	<b>6</b>	<b>Shuruudaha Sharciyeed .....</b>	<b>17</b>
Sideen lacagta ku helaa?		<b>Xuquuqaha Fursado Shaqo oo Loo Siman Yahay .....</b>	<b>17</b>
Sida loo xareeyo Codsigaga Lacag-bixinta toddobaadlaha ah		Maxaan sameeyaa haddii aan rumaysto in aan la kulmay takoor?	
Goorta aad xaraynayso Codsigaga Lacag-bixinta Toddobaadlaha ah		<b>Qaamuuska Erayada .....</b>	<b>18</b>
Goorma ayaan helayaa lacagahayga?		<b>Liiska Hubinta Caawimaadda Dib-u-Shaqaynta .....</b>	<b>19</b>
Maxaa joojin kara ama ii diidi kara gunnooyinka?			
Lacag ka jaritaanada			
<b>Ka Warbixinta Dakhliga: Goorma, Maxaa iyo Sidee .....</b>	<b>8</b>		
<b>U-qalmitaanka iyo Shuruudaha Joogtada ah .....</b>	<b>9</b>		



# Ku saabsan buug-gacmeedkan

## Ujeedada Buug-gacmeedka Sheegashada

Buug-gacmeedkani waxa uu bixinayaa macluumaadka ku saabsan Gunnooyinka Caawimaadda Dib-u-Shaqaynta (RA). Qaamuuska Erehada waxa laga heli karaa bogga 18. Waa inaad akhridaa oo aad fahantaa macluumaadka ku jira dukumentigan. Haddii aadan fahmin ama aad qabtid su'aalo, fadlan la xiriir hay'adeena si aad u hesho caawimaad.

## Macluumaadka xidhiidhka

Waxaa jira siyaabo badan oo aad noola soo xiriiri karto:



### **Booqo websaydkeena**

[dlr.sd.gov](http://dlr.sd.gov)



### **Wac**

**Xarunta Adeegga Macaamiisha:** 605.626.2452  
**Xarunta Wicitaanka Sheegashada:** 605.626.3179  
Adeegyada TTY, wac 7-1-1



### **Qoraal ahaan**

Xarunta Adeegga Macaamiisha: 605.626.2452



### **limayl ahaan**

[dlrraclaims@state.sd.us](mailto:dlrraclaims@state.sd.us)



### **Fakis**

605.626.3172



Sharci ahaan adigaa ka mas'uul ah inaad ogaato macluumaadka ku jira buug-gacmeedkan. Buug-gacmeedkani waxa uu ka kooban yahay macluumaad ku saabsan shuruudaha u-qalmitaanka, buuxinta codsiyada toddobaadlaha ah, iyo maaraynta sheegashadaada.

## Caawimaadda luuqadda

Haddii luqad kale loo baahan yahay, ka wac Adeegga Macaamiisha 605.626.2452 oo codso caawimaad turjumaan. Haddii aad tahay dhagool, maqal kugu adag yahay, ama aad leedahay naafanimo xagga codka ah, fadlan wac 7-1-1.

# Macluumaadka Caawimaadda Dib-u-Shaqaynta

## Waa maxay Caawimaadda Dib-u-Shaqaynta (RA)?

RA waa barnaamij loogu talagalay in dakhli ku meelgaar ah lagu siiyo shaqaalaha shaqadooda waayay iyaga oo aan khalad samayn. Gunnooyinka ma heli karaan dhammaan shaqaalaha. RA waxay u baahan tahay u-qalmitaan la eegayo toddobaad kasta; ma aha kaalmo dadweyne, gunnada sooshiyaal Sekuuritiga, ama barnaamijka lacag bixinta naafada.


## Maalgelinta Barnaamijka RA

Barnaamijkeena RA ee gobolka waxa lagu maalgeliyaa cashuuraha ay bixiyaan loo-shaqeeyayaasha. Wax lacag ah lagama jarayo mushahaarkaaga si aad ugu bixiso gunnada.

## Naga caawi inaan ku caawinno

Waxaan rabnaa inaan kaa caawinno inta lagu jiro waqtigaaga shaqo la'aanta. Si aad u xaqiijiso in lagu siiyo gunnooyinka wakhti ku habboon, waxaad u baahan tahay:

- Bixiso macluumaad sax ah
- Ka jawaabto codsiyada macluumaadka wakhtiga loogu talagalay
- Buuxiso dhammaan shuruudaha si aad ugu qalanto gunnooyinka
- Macluumaadkaaga xiriirka ka dhig mid cusboonaysiisan



## Si aad u hesho adeegga ugu dhaqsiiyaha badan, ka eeg khadka

Xaraynta sheegashadaada, dib uga shaqeysiinta sheegashada, codso lacag bixin, ama hubi heerka ay marayso sheegashadaada adigoo khadka ka eegaya Barta Caawimaadda Dib-u-Shaqaynta (RA Benefits Portal) [sd.gov/rabenefits](https://sd.gov/rabenefits). Waa ammaan waxaana la heli karaa 24 saacadood maalintii, toddobada maalmood usbuucii.

Waa inaad samaysataa ama aad gashaa mySD isla markaana aad buuxisaa diiwaanka borofaylka ee dhamaystiran. Markaad samaysato borofaylka mySD, waxaad ku noqon doontaa [Barta Gunnooyinka RA](#) si aad u buuxiso borofaylkaaga si aad isugu xirto RA iyo akoonnadaada mySD.

Waxaad sidoo kale xaraysan kartaa sheegashadaada adigoo taleefan ku wacaya Xarunta Wicitaanka Sheegashooyinka 605.626.3179, Isniin ilaa Jimco, 8 a.m. to 4:20 p.m. central time (waqtiga dhexe) marka laga reebo fasaxyada gobolka.

Hagahagelitaanka ama samaynta borofaylka ee Barta Gunnooyinka RA ayaa laga heli karaa websaydkeena. <https://dlr.sd.gov/ra/publications/RA-Profile-Setup-Guide.pdf>.

## Warqadaha elegtarooniga ah

Diiwaangelinta waraaqaha elektaroonigga ah waxay kuu ogolaaneysaa inaad si elektaroonig ah u hesho inta badan waraaqahaaga RA, laakiin ma aha dhammaan. Waxaad ka geli kartaa Barta Gunnooyinka RA. Markaad doorato inaad hesho warqadaha elegtarooniga ah ee RA waxaa lagu soo diri doonaa "sanduuqa boostada" ee elektarooniga ah oo sugan oo laguugu diyaariyay websaydkeena.

### Beddelaada cinwaanka ama lambarka taleefanka

Haddii aad gurto ama aad beddesho lambarkaaga taleefanka, nala soo socodsii sida ugu dhakhsaha badan. Ku guuldareysiga in aad ogaysiiso wakaaladeena wixii macluumaad ah oo hadda lagaala soo xiriiri karo waxa ay dib u dhigi kartaa bixinta gunnooyinkaaga. Sida ugu fudud ee aad ku cusboonaysiin karto ciwaankaaga ama lambarka taleefankaaga waa iyada oo loo marayo Barta Gunnooyinka RA oo ah: [sd.gov/rabenefits](https://sd.gov/rabenefits) oo dooro xulashada ku habboon. Waxa laga yaabaa in lagu soo diro boosto ama codsiga macluumaadka kadib marka ay dhacdo taariikhda sheegashadaada.

# Waxa Aad U Baahan Tahay Inaad Ogaato Marka Aad Codsanayso Gunnooyinka

U-qalmitaankaaga gunnada waxay ku salaysan tahay sharciyada iyo xeerarka xukuma barnaamijka RA.

## Si sax ah u soo sheeg sababta aad shaqo la'aan u tahay markaad xerayso sheegashada

Si loo go'aamiyo u-qalmitaankaaga iyo habsocodka sheegashada, waa inaad keentaa taariikhaha shaqooyinka iyo sababaha aadan u shaqaynin 18-kii bilood ee la soo dhaafay, iyada oo aan loo eegin gaabnida muddada.

Sababaha aanad ugu shaqaynayn loo-shaqeeyaha waxay noqon karaan:

- **Shaqada oo lagaa joojiyay** macnaheedu waa shaqadu ma sii soconayso sababtoo ah loo-shaqeeyaha ma hayo shaqo kale oo la qabto
- **La fasaxay (la eryay)** macnaheedu waa shaqadu way sii socotaa, laakiin loo-shaqeeyahaagu ma rabo inaad shaqada sii qabato
- **Iskaga tagitaanka shaqada** macnaheedu waa shaqadu way sii socotaa, laakiin adiga ayaanan rabin, ama ma awoodid inaad sii wado shaqada
- **Weli shaqaynaya** macnaheedu waa inaad shaqaynayso wax ka yar saacadaha aad sida caadiga ah shaqeyso

## Akhri buug-gacmeedkan Sheegashada iyo dhammaan waraaqaha RA

Adiga ayaa mas'uul ka ah ogaanshaha iyo fahamka xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga sida lagu qeexay buug-gacmeedkan. Ogaanshaha shuruudaha waxay kaa caawin doontaa inaad ka soo baxdo waajibaadkaaga sharciga, si fiican u fahamto codsiyada macluumaadka ama ogeysiisyada aad ka hesho RA, iyo inaad ka fogaato lacag-bixinno dheeraad ah, ganaaxyo, iyo khiyaamo. Haddii kadib markaad akhrido buug-gacmeedkan aad qabto wax su'aalo ah ama walaac ah, fadlan la xiriir adeegga macaamiisha.

## Diiwaangelinta shaqada ayaa loo baahan yahay

Haddii aad ku nooshahay meel ka baxsan South Dakota, waa inaad iska diiwaan elisaa adeegyada Wakaaladda Shaqada ee Gobolka waana in aad caddaynta diiwaangelinta u soo gudbisaa xafiiskayaga 14 maalmood gudahooda markaad xerayso sheegashada.

Haddii aad u guurto gobol kale, waa in aad dib u furto sheegashadaada oo aad iska diiwaan geliso shaqada wakaaladda Shaqaalaha Gobolka oo aad hadda deggan tahay.

Codsadayaasha jooga gudaha gobolka ayaa si toos ah uga diiwaan gashan SDWORKS marka sheegashada la xareeyo.

Marka sheegashadaada la xareeyo, waa inaad codsatid lacag-bixinno si aad u hesho gunnooyinka. Codsiyada waxaa la samayn karaa Axada ilaa Sabtida si loo codsado gunnooyinka usbuucii hore.

## Ka warbixi dhammaan saacadaha aad shaqaysay iyo wixii mushahar ah ee aad qaadatay markii aad buuxinayso codsiyada lacag bixinta

- ❖ Warbixin aan sax ahayn oo ku saabsan saacadaha iyo dakhliga ayaa laga yaabaa inay keento inaad hesho lacag-bixin dheeraad ah ama in lagu siin waayo wax lacag ah. *Ka eeg bogga 7 iyo 8* wixii macluumaad ah ee ku saabsan shaqaynta wakhti dhiman iyo helitaanka gunnooyinka qayb ahaan.
- ❖ Haddii aad tahay shaqaale shirkadeed ama aad iskaaga u shaqeysto oo aad xereyneeyso codsiga gunnada, waxaa ku saaran waajibaad ah inaad warbixin soo gudbisno si la mid ah shaqaale kasta oo kale. Waa inaad soo sheegtaa saacado kasta oo aad shaqeyso, xitaa haddii aan lagu siin doonin lacagta shaqadaas.
- ❖ Waa inaad soo sheegtaa dhammaan dakhliga ku soo gala iyadoon loo eegayn usbuuca shaqada ee loo-shaqeeyahaaga ama muddada mushaharka, oo ay ku jiraan iskaa u shaqeysiga (kahor intaan laga jarin kharashyada), xitaa haddii aan lagu siin mushahaarka.

## Haddii ay jiraan cillad u qalmitaan oo weli la xalin, sii wad gudbinta codsiyada lacag bixinta intaad sugayso

Marka cillada u-qalmitaanka ee taagan la xalliyo iyo haddii lagu ogaado inaad u qalanto gunnada, waxaad heli doontaa mushaharka toddobaad kasta oo lacag bixinta la codsadey (marka laga reebo toddobaadka sugitaanka) oo aad buuxisay shuruudaha u-qalmitaanka toddobaadlaha ah.

Macluumaad cusub oo ku saabsan u-qalmitaanka ama heerka lacag bixinta, ka eeg [sd.gov/rabenefits](https://sd.gov/rabenefits)

# Caddadka Gunnooyinka RA

Kadib marka aad xerayso sheegashada gunnooyinka, waxa aad boostada ku heli doontaa [Go'aaminta Lacageed](#). Dib u eeg go'aamintaada lacageed. Haddii ay jiraan mushahar maqan wac Adeegga Macaamiisha. Go'aaminta Lacagta ayaa sharraxaysa:

- Caddadka gunnooyinka ee aad xaq u leedahay inaad hesho **haddii la ansixiyo**
- Wadarta lacagta ugu badan ee gunnada dollarka ah
- Macluumaad ku saabsan sida rafcaan loo qaato ama loo codsado dib-u-eegis lacageed haddii aanad ku qanacsanayn go'aanka

**Xataa haddii Go'aamintaada Lacageed ay muujinayso inaad u qalanto Caddadka Gunnada Toddobaadlaha ah (WBA), dhammaan shuruudaha u-qalmiitaanka waa in la buuxiyaa toddobaad kasta oo aad codsanayso lacag-bixin.**

## Xulashooyinka helitaanka lacag bixinta

Haddii aad u qalanto gunnooyinka, waxa aad gunnadaada u heli doontaa deebaaji toos ah ahaan ama kaarka dhibitka.

- ❖ **Debaaji toos ah** - Xulashadani waxay si toos ah lacag u gelinaysaa akoonkaaga kaydka ama lacagta. Haddii aad hore isugu diiwaan gelisay deebaaji toos ah, gunnooyinkaaga waxa lagu shubi doonaa akoonkii hore ee aad diiwaangelisay.
- ❖ **Kaarka dhibitka** - xulashadani waxa ay ku siinaysaa Mastercard Way2Go ah oo ka socda Comerica Bank. Wax ayaad ku iibsan kartaa, waxaad ku heli kartaa lacag caddaan ah, oo waxaad ku bixin kartaa biilasha meel kasta oo Mastercard laga aqbalo. Kaarka ayaa lagu soo diri doonaa 7-10 maalmood kadib markaad xerayso sheegashadaada. Wixii macluumaad dheeraad ah, kala xiriir Adeegga Macaamiisha ee kaarka Way2Go 1.844.893.3123 ama booqo [goprogram.com](#).

Haddii hadda ka hor lagu soo diray kaarka dhibitka, waxa lacagtaada lagugu siin doonaa kaadhkaas. Kaarkaagu wuxuu shaqaynayaa saddex sano.

Si aad u bedesho habka lacag bixinta, gal Barta Gunnooyinka RA oo dooro xulashada kugu habboon.

## Canshuurta dakhliga federaalka

- ❖ Gunnooyinka waxaa canshuuraya dowladda federaalka. Waxaa lacagtaada todobaadlaha laga reebayaa 10% iyadoo ujeedadu tahay canshuur. Haddii aanad lahayn cashuur lagaa jaray, waxaad masuul ka noqon doontaa bixinta cadadka canshuurta oo buuxa marka la gaaro dhamaadka sanadka.
- ❖ Waaxda Shaqada iyo Sharciga ayaa ku siin doonta foomka IRS 1099-G. Foomkan waxa uu muujinayaa cadadka gunnooyinka lagu siiyay sanadkii hore iyo cadadka cashuurta dakhliga ee laga jaray haddii aad dooratay xulashadaas.
- ❖ Waxaad codsan kartaa wax ka beddelka canshuur dhimista sheegashadaada wakhti kasta adiga oo wacaya Adeegga Macaamiisha.

## Toddobaadka sugitaanka

Toddobaadka ugu horreeya ee sheegashadaada waxaa loo yaqaanaa **toddobaadka sugitaanka**. Waa inaad gudbisaa codsi lacag-bixineed oo aad buuxisaa dhammaan shuruudaha u-qalmiitaanka usbuucan, laakiin lacag laguma siin doono. Lacag bixintaadu waxay bilaaban doontaa usbuuca xiga, waase haddii aad u qalanto gunnooyinka isla markaana aad buuxisay dhammaan shuruudaha.





# U-qalmida Gunnooyinka RA

Hay'adeena waxay dib u eegis ku samayn doontaa [sheegashadaada](#) si loo go'aamiyo inaad u qalanto gunnooyinka. Waxaan eegnaa saddexdan shuruudood:



## 1. Intee in le'eg ayaad shaqeysay 12-18 bilood kahor inta aadan gudbin sheegasho?

Waa inaad heshay mushahar kugu filan 12 ilaa 18 bilood kahor inta aadan xarayn sheegashada. Haddii aadan qaadan mushaar kugu filan, xaq uma yeelan doontid gunnooyinka.



## 2. Waa maxay sababta aadan hadda ugu shaqayn loo-shaqeeyahaagii hore?

Sababta aadan hadda u shaqayn waxay gacan ka gaysanaysaa in la go'aamiyo in aad heli karto gunnooyin iyo in kale.



## 3. Ma awoodaa oo diyaar ma u tahay inaad shaqeyso?

Si aad ugu qalanto gunnooyinka waa inaad:

- Si firfircoon u raadisaa shaqo marka laga reebo haddii ay si kale u tilmaamto hay'adeena
- Maskax ahaan iyo jir ahaanba awood u leedahay inaad shaqeyso
- Si sharci ah loo oggolaaday inaad ka shaqeyso Maraykanka
- Diyaar u tahay inaad aqbasho shaqo cusub (tusaale, aysan ku saarnayn mas'uuliyad shakhsiyeed oo kaa hor istaagi karta inaad shaqeyso)

### Xaaladda Shisheeynimada

Kaliya muwaadiniinta Mareykanka, muwaadiniinta, ama shaqaalaha sharciga ah ayaa u qalma gunnooyinka RA. Haddii aadan ahayn muwaadin Maraykan ah, heerkaaga aqoonsiga waxaa xaqiijin doona Adeegga Dhalashada iyo Socdaalka Maraykanka (USCIS).

## Sababta ka soo tagitaanka shaqada

- ❖ Adiga iyo loo-shaqeeyahaaguba waxaad xaq u leedihiin inaad joojisaan xiriirkiina shaqo. Duruufaha ka soo tagitaanka shaqada ayaa go'aamin doona inaad xaq u leedahay gunnooyinka iyo in kale.
- ❖ Waa inaad si sax ah u soo sheegtaa sababta aad uga soo tagtay shaqada. Waxaan ka codsan doontaa loo-shaqeeyahaaga inuu caddeeyo sababta aad uga soo tagtay shaqada. Haddii ka soo tagistaada shaqada ay sabab u tahay cayrin/hakad-gelin, fasax, shaqada ka soo tagis, ama ka soo saaris shaqo, waxaanu idin waydiin doonaa adiga iyo loo-shaqeeyahaaga wixii tafaasiil ah kadibna waxaanu go'aamin doonaa u-qalmitaankaaga iyadoo loo eegayo sharciga gobolka iyo federaalka.

## Awood leh, la heli karo, oo codsan kara shaqo

### ❖ Waa Inaad Noqotaa Mid

- Jir ahaan iyo maskax ahaanba awood u leh inuu shaqeeyo
- Diyaar u ah inuu aqbalo shaqada isla markiiba haddii shaqo la helo
- Si firfircoon u codsanaya shaqo isla markaana buuxinaya shuruudaha shaqo raadinta
- Haysashada diiwaan dhammaystiran oo ku saabsan codsiyada shaqada toddobaadlaha ah - waxaad ugu baahan doontaa inaad ku codsato lacag-bixin ama haddii loo baahdo in baaritaan lagugu sameeyo
- Ka diiwaan gashan Hay'adda Shaqaalaha ee gobolkaaga haddii aad ku nooshahay meel ka baxsan South Dakota

# Macluumaadka Lacag-bixinta

## Sideen lacagta ku helaa?

Si aad u hesho lacag-bixinnada gunnooyinka, waxaad u baahan doontaa inaad codsato lacag-bixinnada toddobaad kasta. Codsiga toddobaadlaha ah waxaa ku jira su'aalo taxane ah oo kaa caawinaya go'aaminta haddii aad u qalanto inaad sii wadato qaadashada gunnooyinka. Tusaale ahaan, waxaa lagu weydiin doonaa haddii aad:

- Awood u lahayd oo aad diyaar u ahayd inaad aqbasho shaqo
- Shaqo raadisay
- Diiday bandhig shaqo ama shaqo lagu soo bandhigay
- Dhamaystirtay wixii shaqo ah, iyo haddii ay sidaas tahay, inta saacadood ee aad shaqaysay iyo inta lacag ah ee aad ku kasbatay shaqadaas

**Marka loo eego ciqaabta sharciga, waxaa lagaa rabaa inaad si run ah uga jawaabto su'aalaha toddobaad kasta oo aad codsanayso gunnooyinka.**

## Sida loo xareeyo Codsigaga Lacag-bixinta toddobaadlaha ah



### Onlayn ahaan

Si aad u hesho adeegga ugu dhakhsaha badan, booqo Barta Gunnooyinka RA: [sd.gov/rabenefits](http://sd.gov/rabenefits)



### Taleefan ahaan

605.626.3212



### Caawimaadda Luuqadda

Haddii luqad kale loo baahan yahay, ka wac Adeegga Macaamiisha 605.626.2452 oo codso caawimaad turjumaan. Haddii aad tahay dhagool, maqal kugu adag yahay, ama aad leedahay naafanimo xagga codka ah, fadlan wac 7-1-1.

Si aad u codsato lacag bixintaada onlaynka ah waa inaad akoon ku leedahay Barta Gunnooyinka RA. Markaad gasho dooro xulashada ah "Codsiga Lacag-bixinta Gunnooyinka Toddobaadlaha ah."

Haddii aad telefoon ku codsanayso lacag bixinta waa inaad samaysataa PIN 4-god ah. Waxa lagu sheegi doonaa inaad samaysato PIN-ka marka aad taleefoon ku caddayso usbuuca ugu horeeya ee aad awoodo inaad codsato lacag bixin. Adiga ayaa mas'uul ka ah amniga PIN-kaaga iyo wixii lacag bixin ah ee la oggolaaday iyadoo la isticmaalayo lambarkan. Waa inaan cidna loo sheegin ujeedadaas awgeed.

## Goorta aad xaraynayso Codsigaga Lacag-bixinta Toddobaadlaha ah

Axadda ka dambaysa marka ugu horeysa ee aad codsatid gunnooyinka waa maalinta ugu horeysa ee aad soo gudbin karto codsi toddobaadle ah. Codsiyada waa in la dhammaystiraa 11:59 galabnimo wakhtiga dhexe ee sabtida toddobaad kasta oo aad codsanayso gunnooyinka.

Toddobaadyada RA waxay bilaabaan Axadda waxayna dhammaanayaan Sabtida.

**Tusaale ahaan**, haddii aad shaqadaa weyday Isniinta 3<sup>aad</sup>, waxaad xarayn kartaa codsiga koowaad ee gunnooyinka RA isla maalintaas ama maalin kasta oo kale usbuucaas ka mid ah.

Markaa waxaad soo gudbin kartaa codsi toddobaadle ah usbuuca ugu horreeya ee gunnooyinka laga bilaabo Axadda 9<sup>ka</sup>.

Ku guuldareysiga inaad soo gudbiso codsiga toddobaadlaha ka hor 11:59 p.m. wakhtiga dhexe ee sabtida 15<sup>ka</sup> waxa laga yaabaa inay keento dib u dhigista bixinta gunnooyinkaaga ama diidmada gunnooyinkaaga usbuucaas.



## Goorma ayaan helayaa lacagahayga?

Lacagtaada ugu horeysa waxaa la bixin doonaa seddex ilaa afar usbuuc kadib markaad codsato gunnooyinka. Lacag-bixinta toddobaadlaha ah ayaa la bixiyaa laba maalmood oo shaqo ka dib marka la xareeyo codsigaaga haddii aan wax cillado ah la arkin. Maalmaha fasaxyada waxaa laga yaabaa inay dib u dhigaan bixinta lacagaha.

## Maxaa joojin kara ama ii diidi kara gunnooyinka?

Cillad ku aadan sheegashadaada RA ayaa joojin karta lacag bixintaada. Lacag bixintaada dib ayaa loo dhigi doonaa inta dib u eegis lagaga samaynayo.

- Shaqo joojinta
- In shaqo lagaa eryo
- Inaad shaqeyn kari wayd
- In aad fasax ku jirto ama dalka ka maqan tahay
- Dhigashada dugsi
- Jeel/xabsi gelid
- Ku guuldareysiga inaad si firfircoon shaqo u raadsato
- Ku guuldaraysiga ka-qaybgalka Adeegyada Dib-u-shaqaynta
- Ku guul dareysiga bixinta macluumaadka loo baahan yahay
- In la sameeyo bayaan been ah ama aan la soo sheegin xog lagu heli karo gunnooyinka
- Inaad noqoto qof iskii u shaqeysta waqti buuxa

## Lacag ka jaritaanada

Gunnooyinkaaga waxaa laga yaabaa in laga jaro lacago xaaladaha soo socda:

### Dakhliga kale

- Xirmada shaqo ka-goynta, fasaxa, bukanaanshaha, fasaxa, ama mushaharka sii socda ee loo-shaqeeyaha waxay saamayn kartaa gunnooyinkaaga.
- Haddii aad hesho ama bilawdo inaad hesho dakhli kale waa inaad soo sheegtaa. Waxa laga yaabaa in ay wakaaladu kula soo xiriirto si ay kaaga hesho tafaasiil dheeri ah si gacan looga gaysto in la go'aamiyo in lacag laga jari karo iyo in kale.

### Lacagaha hawlgabka iyo naafanimada

- Lacagyada hawlgabka, sida hawlgabka iyo cashuuraha, lacag bixinta hawlgabka naafada, lacag bixinta naafada qayb ahaan ku meelgaarka ah (magdhowga shaqaalaha) waxay saamayn kartaa cadadka gunnooyinka toddobaadlaha ah (WBA).
- Waa inaad noo sheegtaa haddii aad hesho ama aad codsato inaad hesho mid ka mid ah lacagahan.

### Lacag lagugu leeyahay

- Masruuf ilmo oo ay maxkamaddu xukuntay
- Horey u heshay gunnooyinka Kaalmada Dib-u- Shaqaynta kuwaas oo aanad xaq u lahayn, oo aanad dibna u bixin lacag-bixinta dheeraadka ah

### Ka warbixinta shaqada iyo dakhliga

- Haddii aad shaqaynayso, waxa laga yaabaa inaad weli u qalanto gunnooyinka RA qayb ahaan.
- Haddii aad shaqaynayso markaad codsanayso gunnooyinka RA, waa inaad soo sheegtaa inta saacadood ee aad shaqeysay iyo inta lacag ah ee aad shaqeysatay. Waa inaad soo sheegtaa dakhligaaga guud, caddadka lacagta aad kasbatay kahor inta aan wax lacag ah laga jarin.

Xaaladaha qaarkood, waxaa lagugu soo ogeysiin doonaa boostada haddii gunnooyinka la dhimi doono sababahan dartood.

## Ka Warbixinta Dakhliga: Goorma, Maxaa iyo Sidee

Waa masuuliyad adiga ku saaran inaad si sax ah u soo sheegto saacadahaaga shaqada iyo dakhligaaga. Ha isku hallayn saaxiibadaa, asxaabtaada, ama loo shaqeeyahaaga inay kuu sharaxaan sida loo soo sheego saacadaha iyo dakhliga.



### **Goorta la soo sheegayo dakhliga**

Dakhliga ku soo gala waa in la soo sheegaa toddobaad kasta marka la codsanayo gunnooyinka Axadii hore ilaa Sabtida, **xitaa haddii aan weli lagu siin lacagta.**



### **Waa maxay Dakhliga laga soo warbixinayo**

Waa inaad soo sheegtaa dhammaan dakhliga kaa soo gala loo-shaqeeyayaasha usbuuca shaqada, ma aha marka lacagta lagu siiyo. Dakhliyadu waa mushaharka, shaxaadka, lacag-bixinnada aad ku beddesho adeegyo ama alaab, ama lacag caddaan ah iyo lacag-bixinno aan caddaan ahayn sida qolka iyo boodhka.

Dakhliga laga helo isticmaalka wakhtiga fasaxa shaqsiyeed ee mushahaarka leh, fasax, fasaxa jirada, iyo lacag bixinta tababarka.

Mushaharka fasaxa ee usbuuca fasaxu dhaco.

**Soo sheegidda wax ka yar inta aad shaqeysatay waa khiyaano ama si ula kac been-u-sheeg.**



### **Sida loo xisaabiyo dakhliga guud**

**Tirada Saacadaha La Shaqeeyay Todobaadka x Qiimaha Mushaharka = Wadarta Dakhliga**

Tusaale ahaan, haddii aad shaqeysay 30 saacadood todobaadkii \$20 saacaddiiba, waxaad soo gudbin doontaa \$600 oo dakhliga guud ah ee usbuucaas.

**Waa inaad ka jawaabto dhammaan codsiyada macluumaadka RA, xitaa haddii sheegashadaadu tahay mid aan firfircoonayn. Ka jawaabis la'aanta waxay keeni kartaa gunnooyinka lacag bixin oo dheeraad ah iyo/ama diidmo ama dib u dhac ku yimaada lacag bixinadaada mustaqbalka.**

# U-qalmitaanka & Shuruudaha Joogtada ah

## Shuruudaha u-qalmitaanka joogtada ah ee gunnooyinka

### Toddobaad kasta oo lacag-bixinta la codsanayo, waa inaad:

**Awoodaa in aad shaqeyso** – Haddii aad jir ahaan ama maskax ahaan aanad awoodin inaad shaqeyso usbuuca aad gudbinayso gunnooyinka, waa inaad sidaas soo sheegtaa marka aad samayso codsigaaga lacag bixinta.

**Diyaar u tahay inaad shaqayso** – Haddii aadan diyaar u ahayn inaad shaqeyso sabab kasta awgeed, waa inaad ka warbixisaa sidaas markaad codsanayso lacag bixin. Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa inaad sheegto:

- Inaadan shaqayn karin sababtoo ah ma aadan haysan daryeel caruur ama gaadiid.
- Waxaad fasax ka qaadatay shaqada ama ma aad shaqayn dhammaan saacadahaagii caadiga ahaa sababo shakhsi ahaaneed dartood, ma aha sababtu in loo-shaqeeyahaagu uu dhimay saacadahaaga shaqada.

**Codsashada shaqo** – Waa inaad codsato shaqooyinka aad u qalanto inaad qabato oo aad diyaar u tahay inaad aqbasho. Waxaa lagu waydiin doonaa inaad bixiso xiriiradaada shaqo raadinta usbuuc kasta lacag bixinta aad codsato.

- Waa inaad ka warbixisaa macluumaadka xiriirka shaqada ee codsiyada lacag bixinta. Haddii macluumaadkan aan la gelin ama aanu dhammaystirnayn, waxa laga yaabaa in lagu diido gunnooyinka toddobaadkaas.

### Talooyin kaa caawinaya inaad ka soo baxdo shuruudaha shaqo raadinta:

Ogow nooca shaqada aad u qalanto iyo meesha aad ka heli karto.

- Samee liis ay ku qoran yihiin loo-shaqeeyayaasha suurtagalka ah iyo shaqooyinka furan ee hadda jira adiga oo ka hubinaya xafiiskaaga Adeegga Shaqada xayaysiisyada caawimaadaha loo baahan yahay, goobaha shaqada ee internetka, iwm.
- U codso shaqo qof ahaan, adigoo isticmaalaya khadka, ama boostada. Hubinta liisaska shaqada ee onlaynka ah, booradhka adeegga shaqada, xayaysiisyada caawimaadaha loo baahan yahay, ama wacitaanka meherad si aad u waydiiso haddii ay shaqaaleysanayaan ma aha shaqo raadis sax ah.
- Raadinta iskaa-u-shaqeysi kamama buuxinayso shuruudaha shaqo raadinta.

- Codsiyada waxaa laga xaqiijin karaa loo shaqeeyaha. Hayso koobiyada codsiyada, xaqiijinta soo gudbinta, ama imaylada si ay u noqdaan caddayn shaqo raadin.

### Waxa laga yaabaa in lagaa dhafo shaqo raadinta toddobaadlaha ah.

Caawimaadda Dib-u-shaqaynta ayaa ku ogeysiinaysa haddii shuruudaha shaqo raadinta lagaa dhaafay. Sababaha caadiga ah ee ka dhaafida shaqo raadinta waa ku xirnaanta shaqada ama ururka iyo tababarka ay wasaaraddu ansixisay.

- **Ku Xirnaanshaha Shaqada:** Tani waxay ka dhigan tahay inaad haysato taariikh cayiman oo aad kugu laabanayso shaqo waqti-buuxa ah ee loo-shaqeeyaha oo bixiyay 50 boqolkiiba ama ka badan mushaharka wakhtiga aasaasiga ah iyo sababo la xiriira cimilada ama xaaladaha cimilada, shaqada oo aan laga heli karin shaqadaada aasaasiga ah iyo shaqo kale oo ku habboon oo aan heli karin AMA waxaa loo-shaqeeyaha kugu soo celin doonaa shaqo waqti-buuxda ah 10 toddobaad oo isku xigta. Waa inaad weli awood u leedahay oo aad diyaar u tahay shaqada toddobaad kasta oo aad ka warbixiso kala go'a shaqo kasta.
- **Ku Xirnaanshaha Ururka:** Tani waxay la macno tahay inaad xubin ka tahay urur shaqaale oo leh hoolka shaqaaleysiinta.

### Haddii ay RA kuu ogolaato inaad shaqo ama urur shaqaale ku xirnaato:

- Lagaagama baahna inaad shaqo codsato ilaa shaqadaada ama heerka ku xirnaanshaha ururka ka dhamaanayo ama aan la xaqiijin karin
- Waa inaad la xiriirtaa loo-shaqeeyahaaga ama hoolka shaqaaleysiinta ururka
- Haddii ururka shaqaalaha ee aad ku xiran tahay, waa inaad ku jirtaa liiska shaqo la'aanta

Waxaa lagaa rabaa inaad isla markiiba nagu soo wargeliso isbeddel kasta oo ku yimaadda ku xirnaanshahaaga shaqo ama heerka ururkaaga. Haddii aadan ku soo laaban doonin shaqada loo-shaqeeyahaaga waxaa lagaa doonayaa inaad sameyso laba xiriir shaqo.

Xiriirinta shaqada ama ururka waxa laga xaqiijin doonaa loo-shaqeeyahaaga ama ururkaaga. Haddii aad aqbasho shaqo lagu soo bandhigaylaakin aanad isla markiiba bilaabi doonin, wac adeega macaamiisha isla markaaba.

Inaad ka soo warbixiso in aad codsatay shaqo aanad codsanin waa **khyaano**.

# Shuruudaha Shaqo Raadinta

Waxaa lagaa rabaa inaad sameeyso dadaal fir-fircoon, daacadnimo ku jirto si aad u hesho shaqo toddobaad kasta kaas oo gunnooyinka la codsanayo.

- Ugu yaraan laba xiriir shaqo waa in todobaad kasta la sameeyaa
- Xiriirada shaqada waa in lagu sameeyaa usbuuca gudhiisa taas oo gunnooyinka la codsanayo
- Xiriirada shaqada waa in la sameeyaa iyadoo la adeegsanayo habka caadiga ah ee loo-shaqeeyaha ee codsiga, dhammaan isku dayada macquulka ah waa in la sameeyaa si loo gudbiyo codsi ama waraaqaha shaqo raadinta
- Xiriirada shaqo ee qof ahaanta loo sameeyo waa in lala yeeshaa qof (ama hay'ad) leh awoodda shaqaaleysiinta
- Xiriir shaqo oo soo noqnoqda oo lala yeesho isla hal loo-shaqeeye lama aqbali karo marka laga reebo haddii aad ka codsanayso jagooyin kala duwan ama 30 maalmood ay ka soo wareegatay
- Xiriirada shaqadu waa inay ahaadaan shaqada aad rabto oo aad u qalanto inaad qabato iyo meel aad diyaar u tahay inaad ka shaqeyso
- Haddii aad shaqaynayso wakhti dhiman, waa in aad sii wadato gudbinta codsiga shaqada
- Ku dar magaca ganacsiga, qofka lala xiriiriyay, taariikhda xiriirka, booska aad codsatay, nambarka taleefanka ganacsiga, URL-ka haddii aad gudbineyso codsi onlayn ah
- Hayso koobiyada xaqiijinta codsiyada/waraaqaha shaqo raadinta ee si elektaroonig ah loogu gudbiyey loo-shaqeeyaha
- Hayso diiwaan tafatiran oo ku saabsan codsiyadaada shaqo haddii sheegashadaada loo doorto xisaab hubin
- Waa inaad awoodaa inaad soo saarto diiwaannada shaqo raadinta marka ay codsato Gobolka South Dakota

Waa maxay tafaasiisha aan u baahanahay si aan u diiwaan geliyo xiriirada shaqada?

- Magaca ganacsiga
- Qofka lala xiriiriyay
- Taariikhda Codsiga
- Booska aad codsatay
- Lambarka taleefanka ee ganacsiga
- URL-ka haddii ay tahay codsi onlayn ah

**Hay'ada Caawimaadda Dib-u-shaqaynta waxay samayn doontaa xaqiijinta xiriirada shaqo raadinta. Waxaa laga yaabaa in lagu weydiyo inaad soo saarto dukumeenti ku saabsan xiriiradaada shaqo raadinta. Ku guuldareysiga inaad soo saarto dukumeentiyaada xiriirka raadinta shaqada waxay keeni kartaa baabi'inta u-qalmitaankaaga gunnooyinka.**

**Waxyaabaha soo socda looma tixgalinayo inay yihiin xiriirada shaqo ee toddobaadle ah:**

- Diiwaangelinta ama xiriirka lala sameeyo hay'ad shaqaaleysiin ku meelgaar ah
- Inaad shaqooyinka furan ka eegto khadka adigoo codsan
- Isticmaalka loo-shaqeeyahaaga wakhti-dhiman ee hadda ama loo-shaqeeyaha wakhtiga-dhiman inaad ula xiriirto xiriir shaqo ahaan
- Wicitaanka loo shaqeeyaha adigoo waydiinaya inay shaqaaleysanayaan iyo in kale
- Raadinta ama isku shaqaynta ama shaqo qandaraas oo madax-banaan
- Xiriir lala sameeyo qaraabada ama lamaanaha u shaqeeya shirkadda aad shaqo ka codsanayso
- Xiriirada la sameeyay iyadoo loo shaqeeyaha aan la aqoonsan karin (xayeysiisyada sirta ah / qarsoodiga ah)



**Shaqeynta wakhti-dhiman kaama dhigeysa mid beri ah Adeegyada Dib-u-shaqaynta iyo sii wadida raadinta shaqo wakhti-buuxa ah ama shaqo wakhti-dhiman oo dheeraad ah oo lagu darayo wakhti buuxa (40 saacadood ama ka badan todobaadkii).**

# Shaqada Dugsiga, Tababarka, ama Ka Xaadirista Dugsiga

## Shaqaalaysiinta dugsiga

Haddii aad u soo shaqeysay dugsi, mushaharkaaga iyo u-qalmitaankaaga waa in dib loo eegaa iyadoo lagu salaynayo shaqada noocaan ah. RA waxay u baahan tahay inay go'aamiso haddii aad leedahay dammaanad macquul ah oo ku saabsan ku noqoshada shaqada dugsiga.

Hubinta macquulka ah macnaheedu waa inuu jiro heshiis qoran, af, ama si maldahan waxaad u fulin doontaa adeegyo isku mid ah kadib fasaxyada la qorsheeyay ama xilliga tacliineed ee soo socda. Arrintan ayaa lagu dabaqayaa iyada oo aan loo eegayn jagada aad ka qabatay dugsiga.

Mushaharka dugsiga waxa laga yaabaa in laga saaro marka la go'aaminayo caddadkaaga gunnooyinka toddobaadlaha ah (WBA) inta lagu jiro wakhtiga fasaxa dugsiga.

## Tababarka ama imaanshaha dugsiga

Waxaa laga yaabaa inaad u qalanto gunnooyinka RA marka aad dhiganayso dugsiga ama tababarka. Dhammaan shaqooyinka koorsada waa in laga soo warbixiyaa. Waxaana ka mid ah ka xaadirista fasalka iyo qaadashada koorsooyinka khadka tooska ah. Macluumaadkaas ayaa la eegi doonaa si loo go'aamiyo haddii aad u qalanto gunnooyinka.

Tababarka loo-shaqeeyaha uu u baahan yahay ee lagu bixiyo mushahar joogto ah ayaa loo arkaa shaqo. Waa inaad ka warbixisaa saacadahan iyo dakhliga kaa soo gala markaad buuxinayso codsigaaga lacag bixinta, laakiin waxaad kaga jawaabi kartaa "Maya" su'aasha ah "Miyaad ka xaadirtay dugsi ama tababar?"



**Fasaxa dugsiga ee la qorsheeyay waa nasiino lagu muujiyay jadwalka rasmiga ah ee dugsiga (tusaale ahaan, fasaxa jiilaalka, fasaxa gu'ga, iyo fasaxa xagaaga.)**



## Ku Noqoshada Shaqada

Waxda Shaqada iyo Shuruuca waxay bixisaa barnaamijyo iyo adeegyo kala duwan oo bilaasha ah - oo ay ku jiraan hogaaminta shaqada iyo ilaha shaqada - si ay kaaga caawiyaan inaad si dhakhso leh ugu laabato shaqada.

### Isku diwaangeli Adeegyada Dib-u-Shaqaynta

Codsadayaasha jooga gudaha gobolka ayaa si toos ah uga diiwaan gashan SDWORKS marka sheegashada la xareeyo. Codsadayaasha gobolka ka baxsan waxaa looga baahan yahay inay iska diwaan geliyaan hay'addooda shaqo ee gobolka, adeegga shaqada, horumarinta xoogga shaqaalaha, iwm. iyo inay ku soo gudbiyaan caddaynta diiwaangelinta 14 maalmood gudahooda marka la xareeyo codsiga. Caddaynta isdiiwaangelinta waxaa lagu soo diri karaa iimaylka, boostada ama fakiska iyadoo loo dirayo xafiiskayaga.

### Adeegyada Dib-u-Shaqaynta ee Khasabka ah

Waxaa lagaa rabaa inaad ka warbixiso dhammaan adeegyada DLR ee la qorsheeyay. Haddii aad ku guul darreysato inaad ka


## Shaqo Raadin

Xafiisyada Adeegga Shaqadu waa kheyraadkaga shaqo ee adeegga buuxa ah, isla markaana bilaash ah.

### Shaqaalaha Adeegga Shaqada ayaa kaa caawin kara shaqo raadintaada:

- Kaa caawinta inaad samaysato qorshe shaqo raadin
- In lagu tuso agabka iyo kheyraadka aad isticmaali karto marka aad soo gudbinayso codsiyada shaqada
- Dib u eegida agabyada codsigaaga iyo in lagaa caawiyo qorista waraaqaha shaqo codsashada
- Sahaminta adeegyada dib u shaqaaleysiinta iyo dib u tababarida ee laga yaabo in la helo

Caawinaad ayaa diyaar ah haddii aad u baahan tahay isticmaalka kombuyuutar,



soo qaybgasho, gunnooyinkaaga way joogsan doonaan ilaa aad ka tagto xafiiska adeegga shaqada ee degaankaaga. Codsiyada lacag-bixinta toddobaadlaha ah ee la gudbiyay ka dib adeeg la qorsheeyay ama codsi kale lama bixin karo. Haddii aadan awoodin inaad ka warbixiso adeeggaaga la qorsheeyay ama codsiga kale, isla markiiba ogeysii xafiiskaaga Adeegga Shaqada.

### Adeegyada dheeraadka ah ee ku caawinaya

- ❖ **Barnaamijyada Tababarka** - Waxaa laga yaabaa inaad u qalanto tababar ama barnaamijyo waxbarasho si ay kaaga caawiyaan kor u qaadida xirfadahaaga ama dhamaystirka barnaamijka shahaadada. Si aad wax badan uga ogaato haddii aad u qalanto, booqo bogga internetka ee Fursadaha Waxbarashada Dadka Waaweyn: [dlr.sd.gov/workforce\\_services/individuals/training\\_opportunities/default.aspx](http://dlr.sd.gov/workforce_services/individuals/training_opportunities/default.aspx).
- ❖ **Kaalmada Halyeeyda** - Waxaan haynaa barnaamijyo gargaar shaqo ah oo si gaar ah loogu talagalay halyeeyda. Haddii aad tahay halyeey, ka billow Adeegyada Halyeeyda.

### Xafiisyada Adeegga Shaqooyinka

Aberdeen*	605.626.2340
Huron	605.353.7155
Mitchell*	605.995.8060
Pierre*	605.773.3372
Rapid City	605.394.2296
Sioux Falls	605.367.5300
Spearfish*	605.642.6900
Vermillion*	605.677.6900
Watertown	605.882.5131
Yankton	605.668.2900

\*Xafiiska waa ballan kaliya. Fadlan wac si aad ballan u qabsato.

taleefan, ama koobiye si aad ugu samaysato waraaqaha shaqo codsashada.

Dhammaan goobaha xafiiska iyo lambarradooda telefoonku waxay ku qoran yihiin dhanka midig. Sidoo kale waxaad ka hubin kartaa [dlr.sd.gov](http://dlr.sd.gov) si aad u hesho macluumaadka xiriirka ee xafiiska shaqada ee kuugu dhow.

Ka sokow kaalmada shaqo raadinta, DLR waxay kaa caawin kartaa dib u qorista, xirfadaha waraysiga, macluumaadka suuqa shaqada, iyo in kale oo badan.



## Shan (R) oo ay tahay in la xasuusto Marka la codsanayo Gunnooyinka RA

**REVIEW/Dib u eegis** Ogeysiiska Go'aaminta Lacagta. Foomkan waxa uu ku tusayaa caddadka aad heli karto toddobaad kasta iyo wadarta cadadka ku jira sheegashadaada. Haddii ay jiraan mushahar maqan ama si khaldan loo sheegay, la xiriir Adeegga Macaamiisha.

**REQUEST/Codso** lacag bixin. Kadib markaad gubdiso sheegashadaada, waa inaad codsatid lacag bixinta usbuuc kasta oo aad rabto inaad hesho.

**REPORT/GUDBI WARBIKIN** toddobaad kasta:

- Shaqo ka joojin kasta ama ka saaris kasta oo shaqo
- Haddii aad diido wax shaqo ah ama aad fasax ka qaadata shaqada
- Saacadaha shaqada ee usbuuca aad shaqeysay
- Mushaharka toddobaadka ka shaqeysay, ee ma aha toddobaadka la bixiyay
- Codsiyada shaqada ama sii wadida shaqada ama ku xirnaanta ururka

**RESPOND/KA JAWAAB** dhammaan codsiyada macluumaadka aad naga hesho, hadday tahay macluumaad aad ku heshay boostada, iimaylka, ama fariin codeed. Waxaa laga yaabaa inaan kaaga baahanno macluumaad dheeraad ah si aan u go'aamino haddii aad xaq u leedahay gunnooyinka iyo in kale. Haddii aan awoodin inaan helno macluumaadkaas, waxaa laga yaabaa in la joojiyo bixinta gunnooyinka.

**REOPEN/DIB U FUR** sheegashadaada usbuuca aad shaqada ka maqan tahay, ama saacadahaaga la dhimay.

Sheegashadaada waxay u baahan doontaa in dib loo furo haddii:

- Aadan codsan lacag-bixin afar toddobaad oo isku xigta
- Aad ka soo tagtay shaqada
- Aad u guureyso gobol kale

Waxaad dib u furi kartaa oo aad dib bilaabi kartaa sheegashadaada adigoo tagaya khadka [sd.gov/rabenefits](http://sd.gov/rabenefits) ama wacaya Xarunta Wicitaanka Sheegashada.



## Bilaabida iyo Joojinta Sheegashadaada

### Sideen u kansal garayn karaa sheegashadayda?

Si aad u buriso sheegashadaada, waa inaad iimay, boosto, ama fakis ku dirtaa codsi qoraal ah oo saxeexan 15 maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda go'aaminta lacageed:

Benefits Section

Reemployment Assistance Division

PO Box 4730

Aberdeen, SD 57402-4730

Fakis# 605-626-3172

Iimayl: [dlrraclaims@state.sd.us](mailto:dlrraclaims@state.sd.us)

Ma burin kartid sheegashadaada ka dib marka go'aan diidmo ah la soo saaro.

### Sideen u joojin karaa lacag bixinta gunnada?

Si aad u joojiyo lacag bixinta gunnooyinka, kaliya jooji buuxinta codsiyada lacag bixinta. Sheegashadaadu waxay noqon doontaa mid shaqaynaysa marka afar toddobaad la dhaaf adigoo lagu siin wax lacag-bixin ah; dib ayaa looga shaqeysiin karaa wakhti kasta inta lagu jiro sannadka gunnooyinka.

### Sideen dib ugu bilaabayaa lacag bixinta gunnada?

- Dib uga shaqeysii sheegashadaada inta lagu jiro usbuuca aad rabto in lacag bixinta gunnooyinka dib loo bilaabo. Waa inaad dib uga shaqeysiisaa sheegashadaada haddii ay jiraan xaaladaha soo socda:
  - Ku laabtay shaqada haddana aad ka soo tagay, xitaa haddii ay tahay hal maalin ama wax ka yar
  - Haddii cinwaankaagu is beddelo sabab la xiriirta inaad u guurtay gobol kale
  - Haddii aanad xarayn codsi lacag-bixineed oo toddobaadle ah muddo afar toddobaad ah ama wax ka badan

Haddii aad shaqeysay, waxaa lagu weydiin doonaa inaad sheegto taariikhda iyo magaca ganacsi ee loo-shaqeeyahaaga ugu dambeeyay. Sababta aad uga soo tagtay shaqada waxay u baahan doontaa in dib loo eego si loo go'aamiyo u-qalmitaankaaga. Ka dib markii sheegashadaada dib looga shaqeysiiyo, waxaad bilaabi kartaa xaraynta codsiyada lacag bixinta mar kale. Haddii aadan dib uga shaqeysiin sheegashadaada usbuuca aad rabto in gunnooyinka dib loo bilaabo, waxaa laga yaabaa in aan lacag lagu siin toddobaadkaas. Waa inaad dib uga shaqeysiisaa toddobaadka ugu horreeya ee aad shaqada ka maqan tahay, ama saacadahaaga shaqada la dhimay.

Waxaad dib uga shaqeysiin kartaa sheegashadaada adigoo tagaya [sd.gov/rabenefits](http://sd.gov/rabenefits) ama wacaya Xarunta Wicitaanka Sheegashada.

# Khiyaanida RA

Khiyaanadu waa dembi culus. Warbixinnada ku saabsan wax-is-daba-marinta la tuhunsan yahay si fiican ayaa loo baari doonaa. Haddii aad bixiso macluumaad been ah si aad u hesho ama u kordhiso gunnooyinka RA, waxaad samaynaysaa khiyaano. Haddii aad sameyso khiyaano RA, waa inaad dib u soo celisaa gunnooyin kasta oo aad heshay, oo lagu daray Ciqaab Lacageed oo u dhiganta 50% ee gunnooyinkaas, iyo 100% dembi kasta oo intaas ka dambeeya. Intaa waxaa dheer, waxaa laga yaabaa in lagaa joojiyo inaad hesho gunnooyinka ilaa 52 toddobaad waxaana lagugu soo oogi karaa dacwad dembi oo xatooyo culus ah.

## Khiyaanada RA waxaa ka mid ah:

### Ka been sheegida saacadaha la shaqeyay ama dakhliga

- Waa inaad soo sheegtaa **dhammaan** saacadaha shaqada, kuwa **mushahaarka lagu qaato iyo kuwa aan lagu qaadanba**, ee aad shaqeyso usbuuc kasta.
- Waa in aad soo sheegtaa **dhammaan** dakhligaaga shaqada aad qabato toddobaadkii.
- Waxaa lagaa rabaa inaad soo sheegto saacadahaaga shaqada iyo dakhligaaga guud inta lagu jiro usbuuca aad shaqeyso, maaha marka aad mushahar qaadato. Booqo [dlr.sd.gov/ra](http://dlr.sd.gov/ra) si aad u hesho macluumaad badan oo ku saabsan ka warbixinta saacadaha shaqada iyo dakhligaaga.

### Si khaldan uga soo warbixinta saacadaha shaqada

Waa inaad shaqo dalbataa oo aad soo gudbisaa codsiyadaada shaqo toddobaad kasta. Haddii aad ku guul dareysato inaad shaqo u codsato habka uu faray loo-shaqeeyaha, uma qalantid gunnooyinka.

Tusaale ahaan macluumaadka loo baahan yahay marka aad ka warbixinayso codsiyada shaqada, ka eeg bogga 10.

Foomka lagu qoro dadaalkaaga shaqo raadinta waxaa lagala soo degi karaa [dlr.sd.gov/ra](http://dlr.sd.gov/ra).

### Inaad si daacadnimo ah u sheegi wayso sababta aadan u shaqaynayn (ama aad ku guul daraysato inaad ka warbixiso sababta aad uga soo tagtay shaqada.

Waa in aad soo sheegtaa dhammaan ka soo tagitaanada shaqada (joojinta iyo ka soo saarista labaduba) marka aad xeraynayso ama dib uga shaqeysiinayso sheegashada ama aad codsanayso lacag-bixin.

### Diidmada shaqada ama wareysiga

Haddii aad diido shaqo ama waraysi markaad codsanayso lacag-bixinno, waa inaad arrintaas kaga warbixisaa codsigaaga lacag-bixinta. Ku guuldareysiga inaad u soo xaadirto shaqada ama wareysiga sidoo kale waxaa loo tixgeliyaa diidmo waana in la soo sheegaa. Ku guuldareysiga in la soo sheego diidmada shaqada waxaa loo qaadan karaa khiyaano.

### Si khaldan u muujinta kartidaada iyo diyaar u ahaanshahaaga shaqo

Haddii aadan awoodin iyo/ama diyaar u ahayn shaqada sababo jirro, safar, gaadiid la'aan, ama xanaanada carruurta awgood, waxaa laga yaabaa inaad u qalmin gunnooyinka.

### Samaynta "xatooyada aqoonsiga" markaad buuxinayso sheegasho adigoo isticmaalaya magaca iyo lambarka bulshada ee qof kale ama inaad ka caawiso qof kale inuu xareeyo sheegasho been abuur ah

Waa inaad guudbin sheegasho adigoo isticmaalaya Lambarka Aqoonsiga Shakhsi ahaaneed (PIN), Lambarka Bulshada, ama lambarka aqoonsiga. Sidoo kale waa inaad u oggolaan qof kale inuu kuu xareeyo codsiga gunnooyinka adiga oo isticmaalaya mid ka mid ah macluumaadka kore. Samaynta arrintaas waxa laga yaabaa in lagugu xukumo.

### Ku guuldareysiga in la soo sheego magdhowga shaqaalaha, naafanimada, ama hawlgabka

Waa inaad noo sheegtaa haddii aad hesho mid ka mid ah lacagahan marka aad codsanayso gunnooyinka Kaalmada Dib-u-shaqaynta.

### Samaynta bayaan been ah ama been abuur ah si aad u hesho lacag bixin

Waa inaad noqotaa qof daacad ah oo saxan markaad xeraynayso sheegashadaada. Ha qararin macluumaad. Qarinta xogta waxay la mid tahay adigoo bixiyay xog been ah.

Haddii aad wax su'aalo ah ka qabto shuruudaha warbixinta, fadlan la xiriir adeegga macaamiisha.

**Si aad uga warbixiso khiyaanada RA:**

Wac 605.626.7649

ama iimayl u dir

[RAFraud@state.sd.us](mailto:RAFraud@state.sd.us)

# MUHIIM AH

## RA waxay mas'uul ka tahay inay hubiso in gunnooyinka la bixiyo marka ay wakhtigooda gaaraan. Waa mas'uuliyaddaada inaad si daacad ah oo soo sheegto macluumaadkan hoose ee loogu baahan yahay sheegashadaada:

Ka tagitaanka shaqada • Codsiyada shaqada • Saacadaha shaqada iyo dakhliga • Lacag dhimista

Ku Xirnaanta Shaqada ama Ururka • Qaadashada lacagaha naafanimada • Diidmada shaqada

Abaalmarinnada mushaharka dib u celinta ah • Bilaabida shaqo cusub ama ku noqoshada shaqada

## Lacag-bixinta Xad Dhaafka ah ee RA

### Maxaa dhacaya haddii aan helo lacago aanan xaq u lahayn?

Taas waxaa loo arkaa lacag bixin dheeraad ah, waana in si buuxda loo soo celiyaa. Waxaad heli doontaa go'aaminta lacag bixinta dheeraadka ah iyo biil bille ah.

- ❖ **Haddii** aad u-qalanto inaad hesho gunnooyinka, lacag-bixintaada waxa lagu dabaqi doonaa lacag-bixinta dheeraadka ah.
- ❖ **Haddii** aanad qaadanayn gunnooyinka RA, waa inaad diyaarisaa inaad samayso lacag-bixin joogto ah.
- ❖ **Haddii** aad khalad ku leedahay dulsaarka dheeraadka ah ee 12% sannadkiiba ah, taasi bilaabanaysaa taariikhda go'aaminta lacag-bixinta dheeraadka ah.

Haddii lacag bixinta dheeraadka ah aan si degdeg ah loo bixin, RA waxaa laga yaabaa inay qaado mid ama in ka badan oo ka mid ah tallaabooyinka soo socda:

- Canshuur celintaada dakhliga federaalka waxaa laga yaabaa in la dhimo haddii lacag-bixinta dheeraadka ah ay ka dhalatay khiyaano.
- Waxaa laga yaabaa in lagaa gudbiyo dacwo ka dhan ah hantidaada.

## Ciqaab maamul

Haddii ganaax maamul lagugu dabaqo sabab la xiriirta go'aaminta lacag-bixinta dheeraadka ah waxaad u baahan doontaa inaad sii wadato buuxinta codsigaaga lacag-bixinta toddobaadlaha ah waana inaad buuxisaa dhammaan shuruudaha u-qalmitaanka. Wax lacag ah laguma siin doono toddobaadyadan, laakiin waxaad heli doontaa dhibco ku aadan ganaaxa.

## Ka-dhaafida lacag bixinta xad dhaafka ah

Ka-cafinta lacag bixinta dheeraadka ah waxaa laga yaabaa in lagu ogolaado haddii lacag bixinta dheeraadka ah ay tahay mid ka dhalatay qaladka waaxda ama haddii lacag bixinta dheeraadka ah aysan ahayn mid ka dhalatay khiyaano, oo dib u bixinteeduna ay kuu keenayso dhibaato dhaqaale. Codsiga ah in lagaa dhaafo lacag-bixinta dheeraadka ah waxaa loo gudbin karaa si la mid ah rafcaanka. Codsiga waa inuu sheegaa sababta aad u aaminsan tahay in dib u soo celinta lacag-bixinta dheeraadka ah ay tahay in lagaa dhaafo. Codsiga ka cafinta ayaa laga heli karaa khadka [dlr.sd.gov/ra](http://dlr.sd.gov/ra).

## Baaritaanada sheegashada

RA waxay leedahay barnaamijyo baaritaan oo lagu hubinayo gunnooyinka in loo bixiyay si sax ah. Sheegashooyinka si aan kala sooc lahayn ayaa loo doortaa si loo baaro. Haddii aad ku guul dareysato inaad ka jawaabto waqti ku habboon ama aad diido inaad gacan ka gaysato baaritaanka, waxaa laga yaabaa in lagu diido gunnooyinka.

Noocyada baaritaanada waa:

- ❖ **Cabbirka Saxnaanta Gunnooyinka (BAM) Baaritaanka** ayaa dib loogu eegayaa shaqooyinkii hore, codsiyada shaqada, saacadaha la shaqeeyay iyo dakhliga inta lagu jiro sheegashadaada, iyo wixii macluumaad dheeraad ah ee la xiriira sheegashadaada.
- ❖ **Baaritaanka Sheegashada** - Dib u eegida saacadahaaga la soo sheegay iyo dakhligaaga marka la barbardhigo warbixinnada mushaharka ee loo-shaqeeyaha.
- ❖ **Baaritaanka codsiyada shaqooyinka** - Dib u eegida codsiyadaada shaqo todobaadlaha ah iyo ka xaqiijinta loo-shaqeeyaha.
- ❖ **Xaqiijinta ku xirnaanta shaqada iyo/ama ururka** – Dib u eegis ku saabsan xiriirka joogtada ah ee aad la leedahay **loo-shaqeeyaha ama ururkaaga**.

## Xaqiijinta Macluumaadka

Macluumaadka aad bixiso ayaa la xaqiijiyaa si loo xaqiijiyay in kaliya dadka u leh ay helaan gunnooyinka. Waa muhiim in had iyo jeer la bixiyo xog dhamaystiran oo run ah.

Loo-shaqeeyayaasha waxaa looga baahan yahay inay ka warbixiyaan shaqaale kasta oo cusub oo la shaqaaleysiyo iyagoo ku qoraya Tusaha Qaranka ee Shaqaaleysiinta Cusub. Macluumaadkan waa la isbarbardhigayaa si loo ogaado in dadku ay qaadanayaan gunnooyinka ka dib markay shaqada bilaabaan.

Waxaan sidoo kale macluumaadkaaga ka xaqiijinaa wakaaladaha kale ee gobolka iyo federaalka.

# Go'aannada u-qalmitaanka, Habka Racfaanka, iyo Dib-ugu-qalmitaanka

## Go'aaminta u-qalmitaanka

Waxaad heli doontaa Ogeysiis qoraal ah oo go'aan ka gaaraya arrimaha u-qalmitaanka ee saameeya sheegashadaada. Si taxaddar leh oo dhammaystiran u akhri ogeysiisyadan.

## Habka racfaanka

Rafcaanku waa codsi dib loogu eegayo Go'aanka, Go'aaminta, ama Go'aanka Dhageysiga kaas oo aadan ku qanacsanayn. Waxaad xaq u leedahay in aad racfaan ka qaadata go'aamada laga gaaray sheegashadaada. Loo-shaqeeyahaagu wuxuu xaq u leeyahay inuu rafcaan ka qaato go'aanka la xiriira ka tagitaankaaga shaqada. Adiga ama loo-shaqeeyahaagu waxaad haysataan 15 maalmood laga bilaabo taariikhda Go'aanka, Dib u Go'aaminta, ama Go'aanka Dhageysiga si aad u gudbisaan Racfaan. Si taxadar leh u akhri ogeysiis kasta oo lagugu siinayo tilmaamo gaar ah oo ku saabsan sida loo xareeyo racfaanka.

## Hannaanka:

- ❖ Haddii adiga ama loo-shaqeeyahaagu aad khilaafsan tihiin Ogeysiiska Go'aanka, midkiin ayaa racfaan ka qaadan kara. Waxaa lagu weydiin doonaa inaad keento sababta aad u khilaafsan tahay.
- ❖ Waxaad rafcaan ka qaadan kartaa adiga oo raacaya tilmaamaha ku qoran Ogeysiiska Go'aanka. Rafcaannada waxaa lagu aqbali karaa oo keliya boostada ama fakiska. Marka aad soo gudbiso racfaan, marwalba isha ku haay boostadaada. Waxaad heli doontaa Ogeysiis Dhegeysi ah oo wata wakhti iyo taariikh cayiman oo dhegaysiga lagu qaban doono taleefan. Si aad wax badan uga ogaato hannaanka rafcaanka, aad [dlr.sd.gov/ra](http://dlr.sd.gov/ra).
- ❖ Haddii adiga ama loo-shaqeeyahaagu aad khilaafaan Go'aanka Dhegeysiga, midkiin waxaad codsan kartaan dib-u-eegis ay Waaxda Shaqada iyo Sharciga samayso adigoo warqad u diraya Xoghayaha 15 maalmood gudahooda kadib taariikhda go'aanka. Haddii aadan ku raacsanayn go'aanka Xoghayaha, waxaad xaq u leedahay inaad rafcaan ka qaadata Maxkamadda Wareegtada 30 maalmood gudahood.

Sii wad codsashada lacag-bixinta inta rafcaankaaga laga shaqeynayo. Haddii go'aanku kuu ogolaado inaad hesho gunnooyinka, waxa lagu siin doonaa oo keliya toddobaadyada aad wakhti fiican ku gudbisatay codsiyada. Haddii go'aanka laguugu oggolaaday qaadashada gunnooyinka la beddelo, waxaa lagaa doonayaa inaad dib u soo celiso gunnooyinka aad qaadatay toddobaadyadii ay ahayd in lagaa joojiyo.



## Dib-ugu-qalmitaanka

Dib-ugu-qalmitaanka gunnooyinka way ka duwan tahay rafcaan ka qaadashada go'aanka: waxay soo afjaraysaa u-qalmitaan la'aantaada ama muddada aadan u qalmin gunnooyinka.

## Waxaa laga yaabaa inaad u qalanto inaad hesho gunnooyinka haddii:

- ❖ Aad bixisay caddaynta muujinaysa inaad shaqaysay oo aad heshay mushahar la mid ah ama ka badan caddadka gunnooyinkaaga toddobaadlaha ah ugu yaraan lix toddobaad oo kalendarka ah. Mushaharka waxaa looga baahan yahay inuu ka yimaado shaqo (shaqooyin) cusub oo ay daboosho RA. Ka soo tagitaankii ugu dambeysay ee shaqada ayaa markaa dib loo eegi doonaa si loo eego u-qalmitaanka.
- ❖ Aad noqoto mid karti u leh, diyaar u ah, isla markaana aad si firfircoon u codsanaysa shaqo.

## Shuruudaha Sharciyeed

**MACLUUMAADKA LAGA YAABO INAAN WADAAGNO** Xeerka Dhimista Nusqaanka ee 1984 (Sharciga Dadweynaha 98-369) wuxuu u baahan yahay in wakaaladaha gobolka qaarkood ay ilaaliyaan nidaamka xaqiijinta u-qalmitaanka iyo dakhliga. Nidaamkan waxa loo isticmaalaa si loo xaqiijiyo u-qalmitaanka Barnaamijka Kaalmada Nafaqada Dheeraadka ah, Kaalmada Qoysaska Carruurta Ku Tiirsan ama Medicaid; iyo mas'uuliyadda suurtagalka ah ee lacagaha masruufka ilmaha. Wakaaladaha gobolka ee maamula barnaamijyadan ayaa laga yaabaa inay xaqiijiyaan u-qalmitaankaaga gunnooyinka (ama waajibaadka masruufka ilmaha) iyagoo isticmaalaya macluumaadka ku jira diiwaanada Waaxda Shaqada iyo Sharciga. Macluumaadka la isticmaalaya wuxuu noqon doonaa mushaharkaagii hore, sida ay ku warrameen loo-shaqeeyayaashaadii hore, iyo u-qalmitaankaaga ama helitaanka gunnooyinka caawimaadda dib-u-shaqeynta.

## Xuquuqaha Fursado Shaqo oo Loo Siman Yahay

Waa sharci darro in qaataha kaalmada maaliyadeed ee dawladda dhexe (Waaxda Shaqada iyo Xeerarka) uu ku takooro waxyaabaha soo socda ee ka dhanka ah qof kasta oo ku nool Maraykanka: jinsiyad, midab, diin, jinsi, asal qaran, da'a, naafanimo, ku xirnaansho ama aaminsanaanta xisbi siyaasadeed; iyo ka-faa'iideyste kasta oo barnaamijyada dhaqaale ahaan lagu caawiyay sida hoos timaada Title 1 ee Sharciga Maalgelinta Shaqada iyo Fursadaha ee 1998 (WIOA), iyadoo lagu salaynayo muwaadinimada/xaalad qaxootinimo ee ka faa'iidaystaha sida sharciga uu ogolaaday in uu ka shaqeeyo Maraykanka ama ka qaybqaadashadiisa barnaamij kasta ama waxqabad kasta oo dhaqaale oo ah WIOA Title 1 oo lagu caawiyo. Qaataha waa inuusan qofna ku takoorin mid ka mid ah waxyaabaha soo socda:

- Go'aaminta cidda la aqbali doono, ama geli doonta, barnaamij kasta ama hawl kasta oo WIOA Title 1 ah
- Bixinta fursadaha, ama ula dhaqmida qof kasta ee la xiriira, barnaamijka ama waxqabadkan
- Gaaritaanka go'aannada shaqaalaynta ee maamulka ee, ama la xiriira, barnaamij ama waxqabad noocaas ah

## Maxaan sameeyaa haddii aan rumaysto in aan la kulmay takoor?

Haddii aad u malaynayso in lagugu sameeyay takoorid hoos timaada barnaamijka ama waxqabadka WIOA Title 1, waxaad gudbin kartaa cabasho 180 maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda xadgudubka uu dhacay adigoo u gudbinaya mid ka mid ah xafiisyada hoos ku qoran:

Department of Labor and Regulation  
Equal Opportunity Officer  
123 W. Missouri Ave.  
Pierre, SD 57501  
Taleefonka: 605.773.3095  
[derek.gustafson@state.sd.us](mailto:derek.gustafson@state.sd.us)

Kadib markaad cabashadaada u gudbiso qaataha, waa inaad sugtaa ilaa qaataha uu ka soo saaro Ogeysiis qoran oo ah Talaabada Ugu Danbaysa, ama 90 maalmood ay ka soo wareegato (hadba mida soo horeysa), ka hor inta aanad u gudbin Xarunta Xuquuqaha Madaniga ah (CRC) (eeg cinwaanka hoose). Haddii qaatahuhu aanu ku siin Ogeysiis qoran oo ah Talaabada Ugu Danbaysa 90 maalmood gudahooda laga bilaabo maalinta aad cabashada gudbisay, ma aha inaad sugto qaataha inuu soo saaro ogaysiiska kahor inta aanad cabashada u gudbin CRC.

Director  
U.S. Department of Labor  
Civil Rights Center  
200 Constitution Ave. NW  
Room N-4123  
Washington, DC 20210

Si kastaba ha ahaatee, waa inaad cabashadaada u gudbisaa CRC 30 maalmood gudahooda ee 90-ka maalmood ee kama dambaysta ah. (Si kale haddii loo dhigo, waa inaad gudbisaa 120 maalmood gudahooda kadib maalinta aad cabashadaada u gudbisay qaataha.) Haddii qaataha ah uu ku siiyo Ogeysiiska Talaabada Ugu Danbaysa oo qoran ee ku aadan cabashadaada, laakiin aadan ku qanacsanayn go'aanka ama xallinta, waxaad u dacwoon kartaa CRC. Waa inaad cabashadaada u gudbisaa CRC 30 maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda aad heshay Ogeysiiska Talaabada Ugu Danbaysa.

# QAAMUUSKA EREYADA

## **Adeegyada Dib-u-shaqaynta iyo Qiimaynta U-qalmitaanka (RESEA)**

— Waaxda Barnaamijyada Shaqada iyo Xeerarka waxaa loogu talagalay inay kaa caawiso ku laabashada shaqada sida ugu dhakhsaha badan. Ku guuldareysiga ka qaybqaadashada adeegyada waxay keeni kartaa in lagu diido gunnooyinka.

**Anshax-xumo** — Dhaqan aan taxaddar lahayn ama ula kac ah oo sababaha in shaqada lagaa saaro ama lagaa joojiyo. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah daacadnimo-darro la xiriirta shaqada, maqnaansho aan cudurdaar lahayn, ama ku xadgudubka siyaasadda shirkadda.

**Arrinta U-qalmitaanka (Cillad)** — Xaalad ama xaalad suurtagal ah oo kaa hor istaagaysa inaad u qalanto gunnooyinka.

**Caddadka Gunnooyinka Toddobaadlaha ah (WBA)** — Inta ugu badan ee gunnooyinka u-qalmitaanka inaad hesho toddobaadkii. Haddii aad hadda shaqaynayso oo dakhligaagu ka yar yahay WBA-gaaga waxaad heli doontaa gunnooyinka qayb ah.

**Caddadka Gunnooyinka Ugu Badan (MBA)** — Caddadka ugu badan ee gunnooyinka suurtagalka ah ee la heli karo inta lagu jiro sannadka gunnooyinka. MBA waxay ku salaysan tahay mushaharka aad kasbatay Muddada Aasaaska ee codsiga. Macluumaadkan waxaa laga helayaa qaybta Go'aanka Lacagta.

**Ciqaab Maamuleed** — Waxaa lagugu soo rogaa marka aad si ula kac ah ugu guul daraysato inaad soo bandhigo xaqiiqooyinka ama inaad bixiso macluumaad khaldan si aad u hesho, ama u kordhiso gunnooyinkaaga.

**Dakhli Xad Dhaaf ah** — Dakhliga guud inta lagu jiro usbuuca sheegashada ee buuxiya ama ka badan caddadka gunnooyinka toddobaadlaha ah (WBA).

**Dakhliga guud** — Caddadka lacagta lagugu siiyo shaqada ka hor inta aan laga saarin cashuurta iyo wax-ka-jarid la samayn.

**Dhamaadka Sannadka Gunnooyinka (BYE)** — Taariikhda dhammaadka sheegashada. Taariikhaha BYE had iyo jeer waa sabti. Taariikhda BYE waxaa laga heli karaa ogeysiiska go'aaminta lacagta ee gunnooyinka ee aad hesho ka dib markaad codsato gunnooyinka caawimaadda dib-u-shaqaynta.

**Go'aamin/Garsoorid** — Hannaanka loo isticmaalo in lagu go'aamiyo in aad xaq u leedahay in aad hesho gunnooyinka caawimaadda dib-u-shaqaynta.

**Go'aaminta Lacageed** — Foom ayaa lagu soo diray kadib markaad xeraysay codsiga bilowga ah ee gunnooyinka RA. Foomkaas wuxuu sharaxayaa haddii aad lacag ahaan ugu qalanto gunnooyinka RA, inta ay lacag bixintaadu noqon doonto toddobaad kasta, Caddadka Gunnooyinka Ugu Badan (MBA), iyo tafaasiisha kale ee Sannadkan Gunnooyinka. Foomkan waxa uu taxayaa dhammaan loo-shaqeeyayaasha aad u shaqaynaysay muddada Aasaaska ah iyo mushaharka loo-shaqeeye kastaba uu sheegay inuu ku siinayay teeram kasta. Iska xaqiiji inaad fiirisid saxnaanshaha macluumaadka.

**Gunnooyinka Qayb Ahaan ah** — Caddadka gunnooyinka RA ee laga yaabo inaad hesho markaad shaqaynayso saacado yar (wax ka yar saacadahaaga shaqada ee caadiga ah).

**Isdiwaangelinta Shaqada** — Waxaa lagaaga baahan doonaa inaad iska diiwaan geliso shaqada SDWORKS ama wakaaladda shaqaalaha ee gobolka ee loo qoondeeyay marka laga reebo haddii ay kaa dhaafto Qaybta.

**Kala Tagitaanka Shaqada** — Markaad adiga ama loo-shaqeeyahaagu dhammaysaan xiriirkiina shaqo. Tani waxay noqon kartaa sabab la xiriirta shaqo-ka-tagis, shaqo ka-saarid (eryid), fasax maqnaansho, shaqo ka-hakin, ama shaqo-ka-joojin.

**Khiyaano** — Khiyaano khaldan ama dambiilenimo ah oo loogu talagalay in lagu gaaro dano maaliyadeed ama shakhsiyadeed.

**Ku Xirnaanshaha Ururka** — Xubin firfircoon oo ka tirsan ururka oo ka shaqeeya hoolka shaqaalaynta ururka. Haddii aad ku jirto liiska shaqo la'aanta, sida ay xaqiijisay ururkaaga, waxaa laga yaabaa inaad u qalanto

gunnooyinka RA. Waa inaad diyaar u ahaato inaad aqbasho soo jeedinta shaqo ee ururkaaga. Xubnaha la xaqiijiyay inay firfircoon yihiin waa laga dhaafayaa shaqo raadinta.

**Lacag Bixinta Dheeraadka ah** — Gunnooyinka RA ee aad heshay, laakiin ma aadan xaq u lahayn, marka loo eego sharciga gobolka.

**Lambarka Aqoonsiga Shakhsi ahaaneed (PIN)** — Lanbar afar-god ah oo loo isticmaalo aqoonsiga iyo ujeedooyinka amniga, oo uu la socdo lambarkaaga Bulshada, oo la isticmaalo marka sheegashada lagu gudbinayo taleefanka.

**Muddada Aasaasiga ah ee Beddelka ah** — Muddooyin kala duwan oo mushahaar-bixineed oo la tixgeliyo marka la xisaabinayo u-qalmitaankaaga lacagta gunnooyinka. Muddada aasaaska ah ee beddelka ah waa afartii bilood ee ugu dambeeyay ee la dhammeeyey ee ka horreeya marka aad codsanayso gunnooyinka caawimaadda dib-u-shaqaynta.

**Muddada Aasaaska ah** — Muddada wakhtiga loo isticmaalo in lagu go'aamiyo u-qalmitaanka gunnooyinka RA. Marka sheegashadaada bilowga ah la xareeyo, mushaharka afartii hore ee shanta bilood ee u dambeeya ee la dhamaystiray ayaa dib loo eegayaa si loo go'aamiyo u-qalmitaanka gunnooyinka RA. Caddadka Gunnooyinka Toddobaadlaha ah (WBA) waxay sidoo kale ku salaysan tahay inta aad heshay wakhtigan.

**Mushahaar Aan Ku Filnayn** — Sheegashadaada ma laha mushahar ku filan Muddada Aasaaska ah si aad ugu qalanto gunnooyinka. Sidoo kale loo yaqaan "dhaqaale ahaan ugu qalmin."

**Racfaan** — Codsiga rasmiga ah ee adiga ama loo-shaqeeyahaagu si aad u hesho go'aan, go'aan, ama ogeysiis ay dib u eegaan heerka sare ee maamulka.

**Sanadka Gunnooyinka** — Sidoo kale loo yaqaan Sannadka Sheegashada, kani waa 52 toddobaad laga bilaabo Taariikhda Dhaqangalka Sheegashada ilaa Taariikhda Dhammaadka Sheegashada. Kadib marka uu dhamaado Sannadka Gunnooyinka, waxaad xaq u leedahay inaad xeraysay sheegasho cusub.

**SDWORKS** — Xogta shaqada onlaynka ee gobolka South Dakota. Cinwaanka websaydka waa [sdjobs.org](http://sdjobs.org).

**Shaqo La Daboolay ama La Caymiyay** — Shaqada uu loo-shaqeeyaha ku bixiyo cashuuraha RA si uu u daboolo gunnooyinka suurtagalka ah.

**Shaqo waqti-buuxa ah** — Shaqeynta 40 saacadood ama in ka badan todobaadkii.

**Sheegashada Bilowga ah** — Sheegasho cusub oo la xareeyay oo dejinaysa bilowga sannadka gunnooyinka.

**Sheegashada Mushaharka Isku-dhafka ah** — Sheegasho la sameeyay iyadoo la adeegsanayo mushaharka South Dakota iyo hal ama in ka badan oo gobol.

**Taariikhda Dhaqangalka** — Taariikhda bilowga codsiga cusub ee gunnooyinka caawimaadda dib-u-shaqaynta. Taariikhda waxay had iyo jeer ahaan doontaa maalinta Axadda ee usbuuca aad codsatay gunnooyinka caawimaadda dib-u-shaqaynta.

**Toddobaadka Sheegashada** — Muddo toddoba maalmo ah oo isku xigxiga ah oo bilaabmaya 12 saqda dhexe ee Axadda oo dhammaanaya 11:59 p.m. Sabtida xigta.

**Toddobaadka Sugitaanka** — Toddobaadka ugu horreeya ee xaq u yeelashada sheegashada bilowga ah. Toddobaadka sugitaanka waa lacag la'aan, laakiin weli waxaa lagaa rabaa inaad gudbisno codsi lacag-bixineed toddobaadka ah iyo inaad la xiriirta shaqo bixiyeyaal (marka laga reebo haddii lagaa cafiyo).

**Waraaqaha Elekteroonigga ah** — Sanduuqa boostada elegtarooniga ah oo aad dooran karto inaad ku hesho waraaqahaaga caawimada dib-u-shaqaalaynta bedelkii aad u heli lahayd warqad ahaan. Iska diiwaangeli [sd.gov/rabenefits](http://sd.gov/rabenefits).

## LIISKA HUBINTA CAAWIMAADDA DIB-U-SHAQAYNTA

- Dib u eeg ogeysiiskaaga go'aaminta lacagta si aad u aragto saxnaanshaha. Haddii ay jiraan mushahar maqan ama si khaldan loo soo gudbiyay, la xiriir Adeegga Macaamiisha (keliya loogu talagalay sheegashooyinka bilowga ah/cusub).
- Dib u eeg oo ka jawaab warqad kasta oo lagaaga soo diro Waaxda Shaqada iyo Xeerarka.
- Akhri dhammaan buug-gacmeedkaaga sheegashada.
- Iska diiwaan geli shaqada wakaaladda shaqada ee loo qondeeyay ee gobolka aad ku nooshahay. Codsadayaasha gobolka ka baxsan waxay haystaan 14 maalmood oo taariikhi ah laga bilaabo taariikhda dacwadda la xareeyay si ay isu diiwaan galiyaan oo ay u soo gudbiyaan caddaynta diiwaangelinta wakaaladda. Ku guuldareysiga isdiiwaangelinta waxay keeni kartaa luminta gunnooyinka.
- Haddii aad ku nooshahay South Dakota, waxaa si toos ah laguugu diiwaan geliyay xogta shaqada ee gobolka, SDWORKS.
- Si firfircoon u raadi shaqo toddobaad kasta oo aad codsato lacag-bixinta gunnooyinka, oo ay ku jirto toddobaadka sugitaanka ee aan lacagta la bixin, marka laga reebo haddii aan shuruuddan lagaaga dhaafin hay'adda.
- Awood u yeelo, diyaar u noqo inaad aqbasho shaqada toddobaad kasta oo aad codsato lacag bixin.
- Codso lacag bixinta si aad u hesho gunnada. Waxaad codsiga todobaadlaha ah ka xaraysan kartaa [dlr.sd.gov/ra](http://dlr.sd.gov/ra) ama wac 605.626.3212. Codsiga toddobaadle ah waa in la sameeyaa si lacagta loo helo. Tani waxaa ku jira usbuuca sugitaanka ee aan lacagta la bixin.
- Ka warbixi dhammaan saacadahaaga iyo dakhligaaga guud, oo ay ku jiraan saacadaha isku shaqaynta, shaqada waqtiga-dhiman, ama shaqo ku meelgaar ah toddobaadka la shaqeeeyay, xitaa haddii aan lagu siin lacag bixin.
- Ka warbixi dhammaan kala-duwanaanta shaqada iyo diidmooyinka shaqada.
- Jooji codsiga lacag bixinta marka aad bilowdo shaqo waqti-buuxa ah.
- Adeegga Macaamiisha kala xiriir 605.626.2452, Isniin ilaa Jimce laga bilaabo 8 a.m. to 5 p.m. central time (waqtiga dhexe) wixii su'aalo ah oo aad qabto.

**Si looga fogaado khaladaadka oo loo xaqiijiyo bixinta saxda ah ee gunnooyinka, akhri dhammaan macluumaadka lagu siiyay. Sharci ahaan adigaa ka mas'uul ah inaad ogaato oo aad raacdo xeerarka. Ku guuldareysiga in la raaco sharciyada waxay keeni kartaa cawaaqib xun.**



Lagu daabacay warqad dib loo warshadeeyn karo

Barnaamijka Fursadaha Loo Siman Yahay.

200 koobi ayaa lagu daabacay warqad dib loo warshadeeyn karo waxaana sidaas samaysay Waaxda Shaqada iyo Xeerarka ee South Dakota waxaana ku kacay \$3.98 midkiiba.

REV 02/2024